

Diwaan gelinta wakhti dambe sababaha qaxa caruurta la safrayaasha ah

Dacwaddiini magangelyo haddii la soo afjaray, ama aad weli sugeysaan go'aanka kaba dambeysta ah oo markaana sababaha qaxa ee carrurta kula soo safartay aan laga hadlin inta ay dacwadda magangelyo socotay? Markaa inoogu imoow VluchtelingenWerk. Waxaan isla eegeynaa in ay macquul tahay iyo sida loo hirgelin karo in sababahaasi qaxa weli lagu biiyiyo dacwadda magangelyo. Xitaa haddii aad tahay qaan gaar ama ilmo oo aad qabto su'aalo kale ula imow VluchtelingenWerk.

VluchtelingenWerk waxa ay xaadir ku tahay xaruumaha dejjinta magangelyo doonka. Wakhtiyada VluchtelingenWerk ay furan yihiin ee xaruuntaada dejjinta magangelyo doonka ka eego barta www.forrefugees.nl.

VluchtelingenWerk Nederland

Postbus 2894

1000 CW Amsterdam

info@vluchtelingenwerk.nl

www.vluchtelingenwerk.nl



Somalisch



Sababta qaxa ee carruurta in la diwaan geliyo inta ay socoto dacwadda magangelyo

Asbaab magangelyo shaqsi ah ee Carruurta la Safrayaasha ah



Sababta qaxa ee carruurta in la diiwaan geliyo inta ay socoto dacwadda magangelyo

Asbaab magangelyo shaqsi ah ee Carruurta la Safrayaasha ah

Adinka qoys ahaan ayaad Nederland magangelyo uga weydiisateen. Taa awgeed ayeey muhiim u tahay inta ay socoto dacwadda magangelyo in sheekada xubin kasta oo qoyska ka tirsan la soo bandhigo. Xitaa midda carruurta. Sidaasi waxaa lagu helayaa muqaalka guud ee qoyskiinna oo dhan waxaan markaa Adeegga Migreshanka iyo Dhalasho Qaadashada (IND) codsigiinna magangelyo ay ka qaadan karaan go'aan dhaxal gal ah oo dhammeystiran. Waxaa dhici karta cunuga la safraha ah in uu oggolaasho degitaan ku helo sababihiisa gaarka ah oo uu u soo qaxay. Taasi waxaa lagu magacaabaa asbaabta magangelyo ee shaqsi ah.

Sababaha ay caruurta la safrayaasha ah u weydiisan karaan magangelyo shaqsi ah

1. Codsii magangelyo oo ku saleysan isla sababaha dadka qaan gaarka ah

Adiga oo ilma ah ayaad magangelyo weydiisan kartaa ku saleysan sababaha dadka qaan gaarka ah. Tusaale ahaan diintaada awgeed, ama ra'yi gaar ah oo aad qabto oo aan laguugu raacsaneyn ama in aad ka tirsan tahay koox qabiil gaar ah ama bulsho gooni ah.



2. Codsii magangelyo, u qaas ah in aad ilmo tahay

Carrurta khatar ayeey mutaan, u qaas ah in aad ilmo tahay. Tusaale ahaan in laguugu qasbay in aad ciidanka askari ilmo ah ahaan ama qof mujrim ah u dagaal gasho. Ama adiga oo gabar yar ah laguugu qasbay guur, ama aad khatar u gashay in lagu gudo. Waxaa barbar socda in ilmo kasta xuquuq leeyahay. Waxaa dhici karta in ilmo aysan xuquuqaasi ku helin waddanka ay ka yimadeen. Tusaale ahaan xuquuqda waxbarasho iyo daryeel caafimaad oo wacan.



3. Codsii magangelyo, maadaama waalidka(diinta) ay dhibaatooyin haysteen

Haddi aad ilmo tahay waxaa khatar ku gelin kara dhibaatooyinka waalidkada heysta. Tusaale ahaan waxaa ay kuugu hanjabi karaa afduub ama jirdil dadka waalidkaada duulaan ku ah. Ama in adiga iyo waalidkaada(diintaada) la'idiin kala geeyay maadama ay boliiska iyaga kaxeysteen.



Diiwaan gelinta sababaha qaxa caruurta la safrayaasha ah

Inta ay dacwadda magangelyo socota waxaa la soo gaarayaa sababaha qaxa. Waa wakhtiga ay tahay in la sheego xitaa sababaha qaxa ee ilmaha. Wadahadalka waxaa kula yeelanaaya IND. IND-da ayaa go'aan ka qaadata in aad Nederland joogi karto.



- Haddi ay da'daa ka yar tahay **15 sano jir** waalidka ayaa sheegaaya sababaha ilmaha la socdo uu u soo qaxay. Taasi waxa ay ka dhaceysaa isla dhageysiga waalidka ay ku sheegayaan sababahooda qaxa. Haddi ay da'daaka ka yar tahay 15 sano jir aadna dooneyso in aad shaqsi ahaan u sheegato sababaha aad u soo qaxday, mararka qaar taasi waxa soo dhammeyn karo qareenka. Qareenka ayaa kuugu caawini kara in sababahaasi qaxa inta ay dacwadda magangelyo socoto la soo bandhigo.



- Haddi ay da'daa tahay **15 sano jir ama aad ka weyntahay** shaqsi gaasi waxa uu xaq u leeyahay dacwad magangelyo u gaar ah markaa ilmaha la safraha aha isaga ayaa sheeganaaya sababaha uu u soo qaxay. Markaa ballan u gooni ah ayeey IND u sameyneysaa oo lagu wareeysto.